# KOOXDA QAABILSAN HAWLAHA LUUQADA

## Soo koobida Warbixinta Sharci Dejinta
## Oktoobar 2020

Halkaan ka akhri warbixinta oo dhameystiran

### Ujeedada

Sanadkii 2019, sharci deyaashu waxay meel mariyeen sharciga Gobalka Guurtida 1130 (ESHB 1130) kaas oo oggolaaday in la sameeyo koox ka Shaqeysa Halwaha Luuqada. Ujeeddada kooxda waa in lagula taliyo Xaafiiska Kormeeraha Guud ee Macluumaadka Dadwaynaha (OSPI), Ururka Agaasimayaasha Dugsiyada Gobolka Washington (WSSDA), iyo Kuwo kale oo loogu talagalay in lagu hagaajiyo helitaanka macnaha leh, sinnaanta ee ardayda dugsiga dadweynaha iyo xubnaha qoysaskooda ee haysta caqabadaha helitaanka luuqadda. Warbixinta Helitaanka Luuqada ee 2020 ee loo keenay sharci dejiyaasha waxaa ku qoran soojeedino badan, agabyo iyo tusaalayaasha koowaad ee loo maraayo yoolalka degsan.

### Ka qaybgalka Daneeyaasha

Marka lagu daro waayo aragnimada xubnaha kooxdeeda, Kooxda Fududeynta Isticmaalida Luuqada waxay isku dayeen inay la shaqeeyaan ayna ka helaan jawaabcelin xubnaha daneeyayaasha muhiimka ah gaar ahaan arimaha la xariira helitaanka luuqada dugsiyada iyo taloojinta lasoo jeediyay.

Dadaalada ka qaybgalka waxaa kujira wax yaabahaan soosocda:

- Waqti loogu talagalay in dad waynu faallo ka dhiibtaan inta kulanku socdo
- Daraasada waxaa loo qaybiyay dugsiyada iyo xubnaha shaqaalaha, ururo bulshadeedka oo la shaqeeya qoysaska, iyo xubnaha qoysaska
- Bandhigyada kooxaha daneeyayaasha ah
- Kooxaha awooda la saraayo ee leh qoysas ku hadla luuqadooda hooyo waxaa kamid ah: Mandarin, Cantonese, Soomaali, Amxaarik, Tigrinya iyo Isbaanish.

### Erayada Luuqada ee Muhiimka ah

**Ka qaybgalka** Qoyska waxa uu abuuraa xariir labo dhinac ah oo aasaas u ah dhaqanka caddaalada ah oo gacan ka geesanayaa bii'o soo dhaweyn leh: abuurida aaminaada, garasho iyo u dabaaldegida dhaqamada kala duduwan, helitaanka shaqsiyaadka, dhisida xariirka, taageerida iyo udoodista xaquuqda waxbarashada, iyo kala qaybqaadashada qoysaska iyo xaafada waxbarashada caruurta.

**Fasiraada:** Waa nidaam ku salaysan in marka koowaad la fahmo, la qiimeeyo lana turjumo fariinta ama hadalka lagu hadlay kadibna si buuxda loogu turjumo ama loogu badelo luuqada kale ee lagu hadlaayo ama lagu shaqeenaayo.

**Isticmaalida Luuqada:** Waxaa kamid ah qorsheynta, sharciyada, nidaamyada iyo hawlaha loogu talagalay inay noqdaan wax micno sameenaayo, waa xariir labo dhinac ah oo ka dhaxeeya degmada/dugsiga iyo xubnaha qoysaska ee ay ku Yartahay Ku hadalka Luuqada Ingiriiska (LEP), sida dhagoolayaasha, indhoolayaasha ama kuwa u baahan caawimaad isgaarsiineed oo kale, ama kor u qaadista marin u helida qoysaska noocaas ah, hawlaha, iyo waxqabadka degmada/ dugsiga.

**Noocyada kale ee isgaarsiinta:** Waxaa kamid ah farta indhoolayaasha, maqal iyo muuqaal la duubay, iyo nooc kasta oo kale oo ah hab isgaarsiineed oo aan ka ahayn fasiraada, turjumaada luuqada lagu hadlo.

**Turjumaad:** Waa nidaam ka kooban abuurista qoraal luuqadeed oo ah luuqada turjumaanka, ayadoo lagu saleenaayo luuqada aad kasoo turjumayso, si mawduuca iyo xaaladaha, ama fariimaha qoraalku xanbaarsan yahay, isku mid u noqdaan.

**Qorista Luuqada:** Mawduucaan, qorista luuqadu waa nidaam fariimaha qoraalka ah looga dhigaayo habka farta dhagoolayaasha.

# Soojeedinada

## 1. Barnaamijka Helitaanka Luuqada

Ku socota: OSPI, WSSDA

1.a Dooro qiyaamka aasaasiga ah ee helitaanka luuqada iyo ka qaybgalka qoyska, waxyaabaha lagama maarmaanka u ah barnaamijka helitaanka luuqada iyo qorshaha hirgelintiisa.

1.b Samee hab wax ku ool ah oo dugsiyada dadwaynaha ka caawinaaya inay daboolaan baahiyaha luuqada ee bulshadooda ayna kobciyaan, hirgeliyaan, ama qiimeeyaan qorshayaasha iyo hawlaha luuqadooda.

## 2 Barnaamijka Caawimaada Farsamada

Ku socota: OSPI, Sharci dejiyaasha, kuwa kale

Abuurida iyo maalgelinta:

- Isku xiraha Helitaanka Luuqada gaar ahaan heerka Dugsiga
- Isku xiraha Helitaanka Luuqada gaar ahaan heerka Degmada
- Barnaamijka Caawimaada Farsamada ee la xariira Helitaanka Luuqada OSPI gaar ahaan, Heer Gobaleedka

## 3. Erayada Muhiimka ah ee la xariira Waxbarashada

Ku socota: OSPI

Barnaamijka Caawimaada Farsamada ee la xariira Helitaanka Luuqada OSPI waa inuu la shaqeeyo daneeyayaasha, oo ay kujiraan xubnaha bulshada iyo shaqsiyaadka dugsiga, si ay u abuuraan una sharaxaan liis ka kooban erayo waxbarasho oo muhiim ah.

### Nidaamka Heerarka Turjumaada ee Caalamiga ah iyo Nidaamka Tijaabada Turjumaada

Ku socota: OSPI, Sharci dejiyaasha, DSHS

**4.** Qaado nidaam ku saleysan shuruudaha turjubaanka gaar ahaan goobaha la xiriira waxbarashada oo ku saleysan nooca isdhexgalka la tarjumay.

**5.** OSPI Waxay abuurtay tijaabado waxbarasho oo dheeraad ah si ay qayb oga noqdaan nidaamka Tijaabada ee Adeegyada Waaxda Caafimaadka Bulshada ee Hadda (DSHS).

Maalgelinta DSHS si loo kordhiyo tirada luuqada ay si buuxda u turjumaan turjubaanada.

## 6. Muraajacada ugu muhiimsan

Ku socota: OSPI, Dugsiyada iyo Dugsiyada Degmada

Hirgelinta muraajacada ugu fiican ee lasoo jeediyay:

6.a isticmaalida turjumaanada iyo adeegyada turjumaanka ee oonleenka ah iyo

6.b Turjumaada Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah (IEPs) iyo dukumiintiyada loo turjumay qaababka kale.

## 7. Jadwaleenta Turjumaada Luuqada lagu hadlo

Ku socota: Waaxda Adeegyada Ganacsiga (DES)

Waxay bixisaa siminaaro degdeg ah oo lagu qaadanaayo interneetka qalabyo kale oo loogu talagalay shaqaalaha dugsiga waxaana looga hadlaa qaabka loo isticmaalo barta jadwaleynta luuqada lagu hadlo e cusub DES.

## 8. Xeerka masuuliyada waxqabadeed iyo heerarka waxqabadka

Ku socota: Sharci dejiyaasha, OSPI

Waxaa looga baahan yahay OSPI inay qorto WACs oo dejinaaya mas'uuliyadda xirfadeed iyo heerarka waxqabadka ee loogu talagalay turjubaannada ku hadla luuqadaha lagu hadlo iyo kuwa ku hadla luuqada dhagoolayaasha ee goobaha waxbarashada ka baxsan fasalka.

## 9. Isticmaalida iyo Aruurinta Xogta

Ku socota: OSPI

9.a Soo galootiga iyo labada waxbarasho ee OSPI waa inay dib u eegaan ayna muraajaceeyaan, falcelinta bulshada, ayagoo adeegsanaaya daraasada Luuqada Guriga si loo uruuriyo macluumaadka lagu aqoonsanaayo labada luuqadood ee koowaad ee ardayga iyo qoyska.

Ku socota: Dugsiyada iyo Dugsiyada Degmada

9.b Ka qaybgalayaasha kulanka daraasada ee la xariira waxtarka turjumaanka kulan kasta oo la turjumay kadib.

Ku socota: OSPI

9.c Waxay dugsiga iyo dugsiyada degmada ku dhiirigelisaa isticmaalida heshiiska caalamiga ah ee DES 03514 si ay adeegyada turjumaanka oonleen ahaan ugu qabsato ayna heshiis xog la gasho iibiyaha si loo helo loona muujiyo xogta heer degmo ee ku saabsan codsiyada adeegyada tarjumaadda ee ku yaal dusha boodhka xogta.

## 9. Sii wad

Ku socota: Sharci dejiyaasha

9.d Waxaa loo baahan yahay in turjumaanka xogta ku bixiso qaraar wada jirka ah ee guriga 1130 loona soo gudbiyo OSPI kadibna si guud loo soo bandhigo.

## 10. Cusbooneysiinta ku saabsan nidaamyada Sharciyada iyo Xeerarka WSSDA

Ku socota: WSSDA

In la adkeeyo isgaarsiinta wax ku oolka ah iyo xeerarka marin u helida luuqada iyo sameynta cusbooneysiin kale oo lagula taliyay.

Lifaaqyada waxaa kamid ah tusaayaasha a: qiimeynta gudaha ee degmada, xeerka musuuliyada caalamiga ah qaanuunada hawlaha turjumaanada, foomka falcelinta turjumaanka iyo qoraalka qaybaha turjumaada hordhaca ah.

## Shaqada Mustaqbalka

Kooxa Ka shaqeynaysa Hawlaha Luuqada waxay qeexday dhowr meelood ee ay tahay in mustaqbalka laga shaqeeyo oo ay kujiraan:

### Waxbarashada sare

La shaqeynta ururada waxbarashada sare ee gobalka Washington si loo qiimeeyo helitaanka barnaamijyada turjumaanka iyo turjimida iyo in barnaamijyadaan ay ku filan yihiin inay kasoo baxaan baahiyaha hada jira iyo kuwa mustaqbalka la filaayo ee la xariira hawlaha turjumaanada iyo turjumida.

### Dasaraada Hufan

Waa sameynta daraasad hufan si loo qiimeeyo loona oggaado waxtarka nidaamka hadda si loo kobciyo laana sameeyo tijaabooyinka waxbarashada turjumaada laguna daro luuqado dheeraad ah nidaamka tijaabada turjumaanka.

### Heshiisyada Caalamiga ah

Waa jaalayaasha Waaxda Adeegyada ee qaybta ka ah qandaraasyada sayniska ee tarjumaadda iyo turjumida si loo hubiyo inay la kulmaan baahiyaha gaarka ah ee qoysaska, dugsiyada iyo degmooyinka dugsiga.

## Fariimaha Qoysaska

“Marka aan waydiisto turjumaan, waxay i dareensiiyaan niyam xumo. Waxaan waydiistay inay turjumaan IEP-da cunugayga waxayna ii sheegeen inaysan awoodin maadaama in ka badan 30 luuqadood looga hadlo degmadooda marka aysan macquul ahayn inay sidaas ii sameeyaan." - Waalidka Latino

-

"Helida isgaarsiin siman oo lala yeesho waalidiinta dhagoolayaasha ah ayaa dhab ahaantii loo baahan yahay si caruurtooda waxbarashada looga caawiyo." - Jawaabcelinta Xog aruurinta Qoyska iyo Bulshada

-

"Boqolkiiba 99% waxay isticmaalaan luuqada turjumaankana af Soomaaliga si fiican uma yaqaan ama xataa marar waxaaba dhacda inuusan si fiican ugu hadli karin Ingiriiska. Sidoo kale, Turjumaada waxaa laga soo guuriyaa aalada Google-ka taas oo aan bixin turjumid sax ah." Waalidka Soomaaliga ah

-

"Walaalkay waxa uu qabaa baahiyo gaar ah. Mararka qaar, waxaan ka caawin karaa inuu barta galo uuna ka qaybqaato fasalka. Laakiin, hadda waxaan ku mashquulsanahay fasalka sidoo kale marka iima suurtagalayso inaan caawiyo. Hooyaday ma caawin karto walaalkay sababtoo ah waxaa ku adag inay isticmaasho teknoolajiyada ana markasta ma caawin karo. Xataa mararka uu barta gali karo, micnaheedu ma ahan inuu waxbaranaayo. Maadaama uu naafo yahay, waxa uu u baahan yahay caawimaad ana markasta ma caawin karo." Walaalka waalidka ku hadla

### Lifaaqyada:

**Halkaan ka akhri warbixinta oo dhameystiran**

**Warbixinada Daraasada:**

- shaqaalaha dugsiga iyo degmada
- ururada ka dhisan xaafadaha:
- xubnaha qoyska:

**Webseetka Kooxda Shaqada:**

### La xidhiidh

**Maria Flores -** Agaasimaha Fulinta Hawlaha, CISL, OSPI
Iimaylka: maria.flores@k12.wa.us

**Heather Rees -** Falanqeeyaha Cilmi baarista, CISL, OSPI
**Iimaylka:** heather.rees@k12.wa.us